STATSMINISTERENS KONTOR

# War-saxaafadeed

Nr.: 58/21

Taariikh: 5. maajo 2021

## Dadka tallaalan oo talooyinka loo debcinayo

**Dadka qaatay tallaalka koowaad waxay difaacan yihiin laga billaabo saddex toddobaad kaddib marka ay tallaalka koowaad qaataan ilaa iyo 15 toddobaad oo kale. Laga billaabo maanta waxay dadkaan raaci karaan talooyin la mid ah kuwa dadka tallaalka buuxa qaatay. Dadka uu covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay ayaa ayagana sidaas si la mid ah talooyinka loo debcinayaa.**

– Nolol maalmeed aan helayno xornimo xoogaa intii hore ka badan ayaan sii galaynaa. Waxaan maanta soo rogaynaa in talooyin isku mid ah oo debecsan la siiyo dhammaan 1,4-ta milyan ee qof ee ugu yaraan hal tallaal qaatay. Waxaa kuwaas la mid ah kuwa uu covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay, ayay tiri raysalwasaare Erna Solberg.

Dadka soo socda waxaa hadda kaddib loo arkaa in ay "difaacan yihiin", talooyinka ayaana loo debcinayaa mararka lagu kulmayo guryaha gaarka ah:

- Dadka qaatay tallaalka buuxa.
- Dadka qaatay hal tallaal, oo marki la tallaalay ay ka soo wareegeen 3 ilaa 15 toddobaad. Waa in ay Norway joogeen 10-kii maalmood ee u danbeeyay.
- Dadka uu cudurka covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u danbeeyay.

– Wax baan ka beddelaynaa talada inta qof ee ku soo booqan kara. Looma baahna in tirada lagu daro dadka difaacan, ayaga waxaa laga soo qaadayaa in ay ka mid yihiin dadka guriga deggan. Maanta waxaa dadka lagula taliyaa in ay ugu badnaan shan qof booqasho ku imaan karaan. Wax-ka-beddelistaan waxay keenaysaa tusaale ahaan in ay isku mar ku soo booqan karaan shan qof oo aan tallaalnayn iyo labo tallaalan, ayay tiri Solberg.

Laakiin dadka booqashada ku imaanaya waa in aanay ka badnaan tiro aysan suurtaggal ahayn in ay kuwa aan difaacnayn ka fogaan karaan kuwa kale ee aan

Postadresse
P.B. 8001 DEP
0030 OSLO

Regjeringen.no
Twitter
Facebook
Flickr

Kommunikasjonsseksjonen
Telefon: 22 24 40 07

Besøksadresse
Glacisgata 1
OSLO

statssekretær
Rune Alstadsæter
Kontor: 22 24 48 40
Mobil: 91 55 84 19

kommunikasjonssjef
Anne Kristin Hjukse
Kontor: 22 24 40 72
Mobil: 99 21 46 10

ayaguna difaacnayn. Dhammaan dadka difaacan waa in ay ka fogaadaan dadka aanay la degganayn ee aan difaacnayn kana midka ah kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco.

Haddii aad ku nooshahay degmo ay ka jiraan xeer-hoosaadyo ku saabsan inta qof ee ku soo booqan karta, waa in aad xeerarkaas u hoggaansantaa. Maxaa yeelay kuwani weli ma kala saaraan qofka difaacan iyo midka aan difaacnayn.

**Waa la beddelayaa taladii safarka waddanka gudihiisa ee dadka difaacan**
Waxaa muddo dheer dadka lagula talin jirey in ay iska dhaafaan safarrada waddanka gudihiisa ee aan lagama maarmaanka ahayn, ayada oo aan la kala saari jirin qofka difaacan iyo midka aan difaacnayn.

– Waxay dawladdu go'aan ku gaartay in aan, hadda laga billaabo, dadka difaacan lagula talin in ay iska dhaafaan safarrada aan lagama maarmaanka ahayn ee Norway dhexdeeda ah, ayay tiri Solberg.

**Waa muhiim in tallaalka labaad la qaato**
Laga billaabo talaadada 4-ta maajo dadka tallaalka buuxa qaatay waa laga dhaafayaa in ay karantiil galaan haddii cudurka laga helo qof ay u dhowaadeen, laakiin kuwa hal tallaal qaatay waa in tijaabo laga qaado si karantiilkaas looga dhaafo. Karantiilka soo gelidda dalka la iska dhaafi maayo.

– Qiimayn ayaan ku wadnaa in karantiilka soo gelidda dalka laga dhaafi karo dadka tallaalan. Laakiin waxay taasi ku xiran tahay in la helo nidaam si hubanti leh u caddayn kara xaaladda tallaalka ee qofka, si aan uga hortagno in uu cudurku dibedda nooga yimaado, ayuu yiri Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka- iyo daryeelka.

Wuxuu hoosta ka xarriiqay in ay muhiim tahay dhammaan dadka u baahan in laba jeer la tallaalo in ay tallaalka labaad wakhtigiisa ku qaataan, si ay u ahaadaan kuwo qaba tallaal buuxa. Dadka ka yar 65 sano, ee aan ka mid ahayn kooxaha sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco, waa in ay tallaalka labaad qaataan 12 toddobaad kaddib.

Cudurku waa kugu dhici karaa xataa adiga oo tallaalan. Waxaa sidoo kale suurtaggal ah in uu qof tallaalan cudurka sii gudbiyo. Taas oo dhici karta xataa ayada oo aan qofku dareemin in uu cudurka qabo.

– Marka la joogo dibedda dadka dhexdiisa lama ogaan karo in ay kuu dhow yihiin dad ka mid ah kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco oo aan tallaallayn. Ilaa iyo inta ay bulshada jiraan dad badan oo aan cudurka ka

difaacnayn, islamarkaana ay xataa kuwa tallaalan mararka qaarkood cudurka qaadi karaan gudbinna karaan, ayay khasab tahay in ay isku mid ahaadaan talooyinka iyo xeerarka ay raacayaan dadka difaacan iyo kuwa aan difaacnayn marka ay dibedda joogaan, ayuu yiri Høie.

Talooyinku waxay khuseeyaan dadka qaatay tallaal uu aqoonsan yahay Xafiiska daawooyinka ee Yurub EMA.

**Talooyinka la siinayo dadka difaacan**

- Guryaha gaarka ah iyo gaariga dadka difaacan way u dhowaan karaan (1 mitir uga dhowaan karaan) dadka kale ee ayaguna difaacan in kasta oo ay ka mid yihiin kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco.
- Dadka difaacan way u dhowaan karaan dadka aan difaacnayn ee aan ka mid ahayn kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco.
- Dadka difaacan weli waa in ay masaafo wanaagsan (ugu yaraan 1 mitir) ka fogaadaan dadka ka mid ah kuwa sida gaarka ah ugu nugul haddii uu cudurku ku dhoco ee aan difaacnayn ee aanay la degganayn.
- Dadka difaacan waxaa laga soo qaadayaa sidii dad guriga wax ka deggan oo kale oo lagu tirin maayo dadka booqashada ku yimid. Dadka aan difaacnayn ee booqashada ku yimid weli waa in ay masaafo u jirsadaan kuwa kale ee aan ayaguna difaacnayn.
- Dadka difaacan lagulama taliyo in aysan u bixin safarro aan lagama maarmaan ahayn oo Norway dhexdeeda ah. Laakiin inta ay safarka ku jiraan waxaa qabanaya talooyinkii guud ee ahaa in dadka laga fogaado iyo in af-dabool la xirto.
- Dadka dhexdiisa (dibedda oo lagu daray gaadiidka dadweynaha) talooyinka iyo xeerarka waxba lagama beddelin. Sida talooyinka iyo xeerarka inta la kala fogaanayo, tirada, nadaafadda iyo isticmaalka af-daboolka.
- Haddii aad ku nooshahay degmo ay ka jiraan xeer-hoosaadyo ku saabsan inta qof ee guryaha gaarka ah soo booqan karta, waa in aad xeerarkaas u hoggaansantaa. Maxaa yeelay xeerarkaan weli ma kala saarayaan qofka difaacan iyo midka aan difaacnayn.

**Talooyinka guryaha dadka waaweyn lagu xannaaneeyo**
Dadka ku nool guryaha dadka waaweyn lagu xannaaneeyo waxaa hadda ka hor lagula taliyay kuwooda tallaalka buuxa qaatay in ay xaddidaan tirada dadka soo booqanaya.

Machadka caafimaadka dadweynaha ayaa dib u eegaya talooyinka booqshada, wuxuuna soo saari doono faahfaahinno.

Talooyin kala duwan ayaa weli la siin doonaa guryaha gaarka ah iyo goobaha caafimaadka- iyo daryeelka ee degmooyinka maaddaama ay kala duwan tahay halista ‘faafidda cudurka ee goobaha dadka lagu hayo. Meelaha la tallaalay badanka dadka ku nool guryaha dadka waaweyn lagu xannaaneeyo, kuwa tallaalka buuxa qaatay way u dhowaan karaan dadka booqashada ah ee aan tallaalnayn. Tirada dadka booqashada ku imaanaya ma aha in ay ka badnaadaan inta ay dhigayaan go’aammada heer qaran ama heer degmo. Islamarkaana tirada dadka booqashada ku imaanaya waa in aysan ka badnaan in ayaga dhexdooda kala fogaan kara.